GUDDIGA ADAMH EE DEGMADA FRANKLIN OGEYSIISKA DHAQANADA QARSOODINIMADA

ADAMH- Guddida Degmada Franklin ee Khamrada, Daroogada iyo Caafimaadka Dhimirka- waa habka ay maalgeliso dadweynuhu ee daryeelka caafimaadka dhimirka iyo si-xun u-isticmaalka maandooriyaha ee deganayaasha Degmada Franklin. Guddidu waxay qorshaysaa, maalgelisaa, oo qiimaysaa caafimaadka dhimirka, ka hortagga khamrada, iyo si-xun u-isticmaalka maandooriyaha iyo adeegyada daawaynta, oo ay ka mid yihiin maaraynta xaalad; wacyigelinta bulshada, waxbarasho, tababaris; macluumaadka loo-adeegaha iyo gudbinta; daryeel xaalad kadeedan; guriyeynta; daawaynta bukaan-socodka iyo jiifka; kahortagga; iyo adeegyada mihnadaynta iyo shaqaalaynta. Si taas loo qabto, ADAMH waxay kala hawlgashaa ama ay kala hawlgashay ururadan bulshada:

- Dukaanka Horumarka Shakhsiyeed ee Awoodda Saara Afrikaanka
- Alvis/Amethyst
- Buckeye Ranch
- IKHTIYAARADA
- Columbus Area Integrated Health
- Caafimaadka Dadweynaha Columbus
- Naadiga Magaaleed ee Columbus
- Bulshada oo Lagu Hago Jiho Cusub
- Shabakadda Guriyeynta Bulshada
- Shabakada Taageerada Bulshada (Daryeelka Caafimaad ee Habdhaqan ee Twin Valley)
- CompDrug
- Adeegyada Latalinta Concord
- Tilmaamaha Dhallinta iyo Qoysaska
- Goobada Saaxiibtinimada (Schottenstein Chabad House)
- Eastway
- Guriga Rajada ee Caadeystayaasha Khamriga
- Huckleberry House
- Maryhaven
- Caafimaadka Maskaxda America Ohio
- Degmada NAMI Franklin
- Guriga Xaafadaha
- Guryaha Kiniisadda Qaranka
- Isbitaalka Carruurta ee Nationwide
- Adeegyada Caafimaadka Habdhaqanka
- Shirkadda Netcare
- Adeegyada Caafimaadka Dhimirka ee North Central
- Xarumaha Latalinta North Community
- OhioGuidestone
- Xarunta PEER
- PrimaryOne Health
- Southeast Healthcare
- Xarunta Qoyska St. Vincent
- Syntero
- Shabakadda TBI ee Jaamacadda Gobolka Ohio
- Barnaamijka Wacyigelinta Khamriga iyo Daroogada ee Dadka Laga Tirada Badan Yahay ee Magaaleed ee Degmada Franklin
- Village Network

XOGTA COLUMBUS AREA INTEGRATED HEALTH

Gudaha Maajo 2019, xogta loo-adeegaha ee hore ay u hayn jireen Columbus Area Integrated Health waxa loo wareejiyey Guddiga ADAMH ee Degmada Franklin. Xogtaas waxa lagu kaydin doonaa ADAMH oo waxa heli kara loo-adeegayaashii hore ee jiidda Columbus ilaa 2026, goortaas oo la tirtiri doono xogtaas, sida waafaqsan jadwalka haynt xogta ee ADAMH.

OGEYSIISKANI WUXU SHARXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN LAGA YAABO IN LOO ISTICMAALO EE LOO SOO BANDHIGO IYO SIDA AAD U HELI KARTO MACLUUMAADKAN. FADLAN SI TAXADIR LEH DIB UGU FIIRSO.

Ka qorshe caafimaad ahaan, ADAMH waxa sharciyan looga baahan yahay inay ilaaliso qarsoodinimada iyo ammaanka xogtaada caafimaad ee ilaashan. Shaqaalaha ADAMH waxay u heellan yihiin ilaalinta habka asturnaanta ee macluumaadka ee xaaladaada, daaweyntaada, ama kharash bixintaada Caafimaad ee tagtadii, hadda, ama mustaqbalka.

Ogeysiiskani wuxu sharxayaa siyaabaha shaqaalaha ADAMH ay u isticmaali karaan una wadaagi karaan macluumaadka caafimaadkaaga si ay u fuliyaan daawaynta, kharash bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaad iyo ujeedooyin kale oo uu saamaxayo ama loo rabo sharci ahaan. Waxa kale oo ay sharxaysaa xuquuqdaada iyo masuuliyadaha ADAMH'.

ISTICMAALKEENA IYO BANDHIGITAANKEENA

Adeegsi kasta ama bandhigitaan kasta oo ku jira qayb lama liis gareyn; si kasta ha noqotee, dhammaan qaababka shaqaalaha ADAMH loogu ogolaaday inay ku adeegsadaan ama ku wadaagaan macluumaadka waxay ku dhex dhacayaan mid kamid ah.

Caadi ahaan waxaanu ugu adeegsanaa ama ugu wadaagnaa macluumaadkaaga qaababka soo socda:

ADEEGSIYO AMA BANDHIGITAANO LOOGU TALAGALAY DAAWEYNTA, KHARASH BIXINTA IYO HAWLAHA DARYEELKA CAAFIMAAD: Waxa aanu xaq xaddidan u leenahay adeegsiga ama wadaaga macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga kaas oo loogu talagalay daaweynta, kharash bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaad.

Daaweynta: Shaqaalaha ADAMH ma bixiyaan daaweyn.

Kharash Bixinta: Macluumaadkaaga waxa adeegsada shaqaalaha ADAMH si ay u go'aamiyaan u qalmitaankaaga adeegyada ay maalgeliso dawladdu iyo si ay u maareeyaan u qalmitaanka isqorista, biilasha, iyo kharash bixinta adeegyada daryeelkaaga caafimaad.

Kahor inta aanay shaqaaluhu u adeegsan macluumaadkaaga khamriga iyo daroogooyinka kale ujeedooyin kharash bixin, bixiyaha daryeelkaaga waxa laga dalbaday in uu helo ogolaanshahaaga oo qoraal ah si uu u la wadaago macluumaadkaaga ADAMH.

Kahor shaqaaluhu intayna adeegsan macluumaadkaaga caafimaadka dhimirka, bixiyaha daryeelkaagu waxa uu isku dayey in uu helo ogolaanshiyo si uu ula wadaago macluumaadka ADAMH si uu kharash bixin ugu helo alaabaha iyo adeegyada.

Hawlaha Daryeelka Caafimaad: Macluumaadkaaga waxa loo adeegsanayaa ama loo wadaagayaa hawlaha ganacsi ee ADAMH awgood. Tusaale ahaan:

- Macluumaadkaaga waxa adeegsanaya shaqaalaha ADAMH ama waxa loo bandhigayaa bixiyeyaasha adeegyada, kuwaas oo ADAMH ay heshiis hadda ah oo adeegyada bukaanka ah kula jirto, si ay isugu dubo ridaan daryeelkaaga caafimaad;
- Macluumaadkaaga waxa lala wadaagayaa bixiyaha adeegaaga si uu xal uga gaadho cabashooyinkaaga, tabashooyinkaaga, ama dhibaatooyinkaaga adeegga macmiil.
- Macluumaadkaaga waxa loo adeegsanayaa si loo qiimeeyo tayada adeegyada uu ku siiyey bixiyahaaga daryeelku;
- Macluumaadkaaga waxa loola wadaagayaa xisaabiyaha ama looyarka ADAMH ujeedooyin dabagal xisaabeed awgood.

Warbixinada qiimeynta ama dabagalka xisaabta, kuma darno ama kuma dayno magacyada macaamiisha ama uma bandhigno aqoonsiyadooda sinaba.

Kahor inta aanay shaqaaluhu u adeegsan macluumaadkaaga khamriga ama daroogooyinka kale hawlaha daryeelka caafimaad awgood, bixiyahaaga adeega waxa laga dalbaday in uu helo ogolaanshahaaga oo qoraal ah si uu macluumaadkaaga ula wadaago ADAMH.

Haddii macluumaadka caafimaadka dhimirka la bandhigo, kama koobna wax aan ahayn xaaladdaada iyo taariikhdaada daawooyinkaaga iyo caafimaadkaaga jidheed; sookoobitaano wadada daaweyntaada ah iyo baahiyahaaga daaweyneed; sookoobidda bixitaanka; ama xaaladda dhaqaale. Marka laga reebo sababo cayiman, waa in aanu adeegsanaa ama bandhignaa macluumaadka caafimaad ee daruuriga ah ee ugu yar si aanu u gaadhno ujeedada loo gol leeyahay.

ADEEGSIYADA IYO BANDHIGITAANADA OGOLAANSHAHAAGA QORAALKA AH LA'AANTII: Waxa la noo ogol yahay ama la naga dalbadaa in aanu u wadaagno macluumaadkaaga qaabab kale – badanaaba qaabab si wanaagsan wax ugu kordhinaya bulshada, sida caafimaadka dadweynaha iyo cilmi baadhista. Waa inaanu buuxino shuruudo badan oo sharciga ah ka hor inta aanaan u wadaagin macluumaadkaaga ujeedooyinkan awgood.

Ka caawinta dhibaatooyinka caafimaadka iyo badbaadada bulshada: Waxa aanu u wadaagi karnaa macluumaad kugu saabsan adiga xaalado cayiman awgood sida sheegista xadgudub, dayacaad, ama tacaddi guri oo laga shakiyey ama ka hortagga ama yareynta khatar halis ku ah caafimaadka ama badbaadada qof kasta. Macluumaadka khamriga ama daroogooyinka kale waxa keliya loo bandhigi karaa shaqaale caafimaad oo ku jira kiis xaalad degdeg ah oo caafimaad oo dhab ah.

U hogaansanaanta sharciga: Waxa aanu wadaagi doonaa macluumaad kugu saabsan adiga haddii sharciyada gobolka ama federaalku naga dalbadaan, oo ay ka mid yihiin Waaxda Maraykanka ee Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha haddii ay doonayso inay aragto in aanu u hogaansanahay sharciga qarsoodinimada federaalka.

Tan waxa kamid ah dabagalka dhaqaale, baadhitaanada, u doodista, ama hawlaha la socosho ee kale ee xidhiidhka la leh masuuliyadda sharciyeed ee ADAMH ee ku wajahan bixiyeyaasheeda adeegyada. Macluumaadka ku saabsan daryeelka caafimaadka dhimirka waxa sidoo kale loo adeegsan karaa ama loo bandhigi karaa baadhista ama sheegista dhacdooyinka aan caadiga ahayn awgood.

La shaqeynta baadhaha sababta dhimashada, baadhaha caafimaad, ama agaasimaha aaska: Macluumaadka waxa lala wadaagi karaa baadhaha sababta dhimashada, baadhaha caafimaad, ama agaasimaha aaska marka uu qof dhinto.

Wax ka qabashada codsiyada magdhawga shaqaalaha fulinta sharciga, iyo codsiyada kale ee dawladda: Waxa aanu u adeegsan karnaa ama aanu u baahin karnaa macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan adiga:

- Sheegashooyinka magdhawga shaqaalaha;
- Ujeedooyin fulin sharciyeed awgood ama waxa aanu u adeegsan karnaa ama u bandhigi karnaa sarkaal fulinta sharciga ah;
- Hay'adaha kormeerka caafimaadka hawlaha uu sharcigu u ogol yahay awgood;
- Hawlgalada dawladeed ee gaarka ah sida ciidanka, ammaanka qaranka, iyo adeegyada ilaalinta madaxweynaha.

Ka jawaabidda dacwadaha iyo tallaabooyinka sharciyeed: Waxa aanu wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad ee kugu saabsan adiga anaga oo ka jawaabayna amar maxkamadeed ama maamul, ama anaga oo ka jawaabayna amar yeedhitaan maxkamadeed.

ADEEGSIYADA AMA BANDHIGITAANADA U BAAHAN OGOLAANSHAHAAGA QORAALKA AH: Haddii ay dhacdo in uu maqan yahay ka reebitaan sharciyeed, waa in aanu helnaa ogolaanshahaaga qoraalka ah iyada oo sharcigu noo ogolaado ama naga dalbado in aanu adeegsano ama aanu wadaagno macluumaad caafimaad oo ilaashan ogolaansho la'aan mooyee. Marka laga reebo sababo gaar ah, waa in aanu adeegsano ama wadaagno keliya macluumaadka caafimaad ee ilaashan ee daruuriga ah ee ugu yar si aanu u gaadhno ujeedada loo gol leeyahay.

Shaqaalaha ADAMH waxa ay adeegsan karaan ama ay wadaagi karaan macluumaadkaaga keliya haddii aad ogolaansho u siiso suuqayn; iibinta macluumaadka caafimaad ee ilaashan; ama adeegsiyada ama bandhigitaanada kale ee aan lagu sharxin ogaysiiskan. Waxa naga mamnuuc ah adeegsiga ama bandhigitaanka macluumaadka hidde sidaha ujeedooyin caymin awgood.

Waxa aad ka noqon kartaa ogolaanshahaaga adiga oo na siinaya ogaysiis qoraal ah.

ADEEGSIYADA AMA BANDHIGITAANADA AY DHICI KARTO INAAD DIIDO: Waxa aanu wadaagi karnaa xaddi cayiman oo macluumaadkaaga caafimaad ah oo toos xidhiidh ula leh daryeelkaaga, haddii aanu hore kuugu sii wargelino adiguna aanad diidin:

- Qoysaska, asxaabta, ama kuwa kale ee ku hawlan daryeelkaaga, waxa ku saabsan ku-hawlanaantooda tooska ah ee daryeelkaaga ama kharash bixintooda daryeelkaaga;
- Iyada oo la raacayo doonitaanadii hore loo cabbiray, ama haddii ay tahay xaalad degdeg ah oo aan lagu siin karin fursad aad ku diido bandhigitaanka macluumaadka kahor inta aad daaweynta lagu siin;
- Qoyskaaga, saaxiibadaa, ama kuwa ku hawlan daryeelkaaga wax ku saabsan goobtaada, xaaladaada guud, ama dhimashadaada.

XUQUUQDAADA

Marka ay taagan tahay macluumaadkaaga caafimaad, waxa aad leedahay xuquuq cayiman. Qaybtani waxa ay sharxaysaa xuquuqdaada iyo wax kamid ah masuuliyadahayaga si aanu kuu caawino.

Xaqa aad u Leedahay inaad Dalbato Xadidaado in La Saaro Adeegsiyo/Bandhigitaano Cayiman oo ah Xogta Caafimaadka ee Ilaashan: Waxa aad xaq u leedahay inaad naga dalbato inaanu xaddidno sida aanu u adeegsanayno ama u wadaagayno xogtaada caafimaad ee ilaashan. Waajib nagu ma aha inaanu ogolaano codsigaaga yareynta ama xadidaadaha. Illaa xaddiga aanu ogolaanayno, waxa aanu gelin doonaa qoraal waana aanu ku dhaqmi doonaa, marka laga reebo xaaladaha degdega ah. Ma ogolaan karno inaanu xaddidno adeegsiyada ama bandhigitaanada uu sharcigu naga dalbaday.

Xaqa aad u Leedahay inaad Hesho Xidhiidhada Qarsoodiga ah ee Macluumaadka Caafimaad ee Ilaashan: Waxa aad xaq u leedahay inaad naga dalbato inaanu kuugu soo dirno macluumaad cinwaan kale, ama qaab kale. Waxa nagu waajib ah inaanu ogolaano codsigaaga, illaa inta ay si maangal ah noogu fududahay inaanu sidaas samayno ama haddii aad muujiso in cinwaanka kale loogu baahday ammaankaaga awgii.

Xaqa aad u Leedahay inaad Baadho ama aad Nuqul Ka Samaysato Macluumaadka Caafimaad ee Ilaashan: Waxa aad xaq u leedahay

inaad baadho macluumaadkaaga caafimaad ee ilaashan ee ku jira ururka diiwaanka ee laguu qoondeeyey adiga, kaas oo ay ku jiraan diiwaanadaada isdiiwaangelinta iyo sheegashooyinka, diiwaanadaada maareynta daryeelka, iyo sidoo kale diiwaanada ku saabsan cabashooyinkaaga iyo tabashooyinkaaga.

Waa inaad ka dhigtaa codsigaaga qoraal, waxana aanu kuugu soo jawaabi doonaa 30 maalmood gudahood. Haddii aanu kuu diidno marin u helitaankaaga, waxa aanu qoraal kuugu soo gudbin doonaa sababaha. Waxa aad dalban kartaa in diidmada dib loo eego.

Haddii aad doonayso nuqulo ah macluumaadkaaga caafimaad, waxa aad xaq u leedahay inaad doorato qaybaha kamid ah macluumaadkaaga ee aad doonayso inaad nuqul ka samaysato iyo in ogaysiis hore lagu sii siiyo oo ah qiimaha nuqul sameynta.

Xaqa aad u Leedahay inaad Wax Ka Beddesho Macluumaadkaaga Caafimaad ee Ilaashan: Haddii aad aaminsan tahay in uu ku jiro khalad ama macluumaad ay ka maqan yihiin diiwaanadaada, waxa aad dalban kartaa, adiga oo qoraal ahaan ku dalbanaya, in aanu saxno ama aanu ku darno wixii ka maqnaa diiwaankaaga. Waxa aanu kuu soo jawaabi doonaa 60 maalmood gudahood marka aanu helno codsigaaga.

Waxa dhici karta inaanu diidno codsigaaga haddii aanu ogaano in macluumaadku ay sax yihiin oo ay dhamaystiran yihiin; aanaan abuurin anagu; aanay ahayn qayb ka mid ah macluumaadka caafimaadkaaga ee aanu hayno; ama aanay qayb ka ahayn macluumaadkaaga caafimaad ee laguu ogolaan karo inaad baadho ama aad nuqul ka samaysato.

Haddii aanu diidno codsigaaga wax ka beddelka macluumaadka caafimaad ee ilaashan, waxa aanu qoraal ahaan kuugu sheegi doonaa waxa ay yihiin sababuhu. waxa aad xaq u leedahay in codsigaaga, diidmadayada, iyo bayaan kasta oo taas lagaga jawaabayo ee aad bixiso in lagu daro diiwaanadaada.

Haddii aanu ogolaano codsiga, waxa aanu beddeli doonaa macluumaadka waxana aanu kugu wargelin doonaa beddelka. Waxa aanu sidoo kale u sheegi doonaa dadka kale ee ay tahay inay wax ka ogaadaan beddelka lagu sameeyey macluumaadkaaga.

Xaqa aad u Leedahay inaad Hesho Xisaabinta Bandhigitaanada Xogta Caafimaad ee Ilaashan: Waxa aad xaq u leedahay inaad hesho liis ah goorta la diray, cidda loo diray, sababta loo diray, iyo wixii uu ka koobnaa macluumaadka caafimaad ee ilaashan ee loo diray dadka kale. Waxyaabaha laga soo reebayo waxa ka mid ah macluumaadka caadi ahaan loo adeegsado daaweynta, kharash bixinta, iyo hawlaha daryeelka caafimaad; macluumaadka laguu sii daayo adiga ama kuwa ku hawlan daryeelkaaga; macluumaad kasta oo la sii daayo iyada oo la raacayo ogolaanshahaaga qoraalka ah; ama sii deynta loo sameeyo ujeedooyinka ammaanka qaranka fulinta sharciga ama saraakiisha asluubta awgood.

Waxa aanu kaga soo jawaabi doonaa codsigaaga qoraalka ah 60 maalmood gudahood. Codisgaagu waxa uu xidhiidh la yeelan karaa bandhigitaano socday illaa iyo lix sano ka hor. Wax lacag ah lagugu soo dallici maayo liiska ugu horreeya sanad walba, balse lacag ayaa lagugu soo dallici karaa codsiyada soo noqnoqda ee dheeraadka ah.

Xaqa aad u Leedahay inaad Hesho Nuqul Waraaq ah oo Ogaysiiska ah Marka aad Codsato: Waxa aad xaq u leedahay inaad hesho nuqul ah ogaysiiskan wakhti kasta. Ogaysiiskan sidoo kale waxa laga heli karaa websaytkayaga: https://adamhfranklin.org/who-we-serve/hipaa/.

Xaqa aad u Leedahay Ogaysiiska Jabsashada: Kadib marka la ogaado jabsasho macluumaad caafimaad oo ilaashan oo aan ammaankeedu sugneyn, ADAMH waxa ay ogaysiin doontaa qof kasta oo macluumaadkiisa caafimaad ee ilaashan ee aan ammaankeedu sugneyn ay dhacday, ama maangal ahaan ay ADAMH aaminsan tahay inay dhacday, in marin loo helay, gacanta lagu dhigay, la adeegsaday, ama la bandhigay taas oo ka dhalatay jabsashadaas.

WAAJIBAADKAYAGA

ADAMH waxa sharcigu ku waajibinayaa inay ilaaliso qarsoodinimada macluumaadka caafimaad ee ilaashan iyo inay siiso shakhsiyaadka ogaysiis ah waajibaadkeeda sharci iyo siyaasadaheeda qarsoodinimada.

ADAMH waxa laga rabaa inay ku dhaqmaan shuruudaha ogeysiiska hadda shaqaynaya.

ADAMH waxa ay haysataa xaqa ay u leedahay inay beddesho dhaqanadeeda qarsoodinimada ee lagu sharxay ogaysiiskan iyo inay isbeddelada ku dabbaqdo dhammaan macluumaadka caafimaad ee ilaashan ee ay hayso ADAMH. ADAMH waxa ay boosta ugu diri doontaa nuqul ah ogaysiiska cusub dhammaan loo adeegayaasha hadda iyo bixiyeyaasha ku jira nidaamka daryeelka ee ADAMH waxana ay soo dhigi doontaa ogaysiiska cusub websaytkeeda. Waxa aad ka dalban kartaa nuqul ah ogaysiiska cusub masuulka qarsoodinimada ee ADAMH.

CABASHOOYINKA

ADAMH wax aargoosi ah kugu ma sameyn doonto haddii aad cabasho gudbiso. Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaadii qarsoodinimada ay ku xadgudubtay ADAMH, waxa aad ku xarayn kartaa cabasho qoraal ah:

- ADAMH: Masuulka Qarsoodinimada, Guddiga ADAMH ee Degmada Franklin, 447 East Broad Street, Columbus, Ohio 43215 ama (614)-224-1075
- Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah: Xafiiska Gobolka V ee Xuquuqda Madaniga ah, Waaxda Maraykanka ee Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha, 223 North Michigan Avenue, Suite 240, Chicago, Illinois 60601 ama (800) 368-1019; TDD: (800) 537-7697; Iimeyl: ocrmail@hhs.gov

LA XIDHIIDH

U gudbi codsigaaga ku saabsan macluumaadkaaga caafimaad ee ilaashan: Masuulka Qarsoodinimada, Guddiga ADAMH ee Degmada Franklin, 447 East Broad Street, Columbus, Ohio 43215, 614-224-1075, ama records@adamhfranklin.org

TAARIIKHDA DHAQANGALKA

Ogaysiiskani waxa uu dhaqangalayaa laga bilaabo Jeenawari 1, 2021.

FIIRO GAARA: Adeegyada Caawimaada Luuqada, oo lacag la'aan ah, ayaad heli kartaa. Wac 1-614-224-1057.